


JUNE 2023

CADADKII 17 AAD

MAGAZINE

MAGAALO



URURKA DAWLADAHA HOOSE EE SOMALILAND (ALGASL)

TUSMADA WARSIDAHA

1

About
Algasl

2

Our key
achievements
2023

3

Xilka iyo
Waajibaadka
Golayaasha
Deegaanka la soo
doortay

4

Maamul-daada-
jinta waxbrashada
asaasiga ah ee de-
gmooyinka dalka

5

Uclg-cib meeting
for local
Governments
Associations
Conference

6

Ceel-afweyn

Ceel-afweyn oo cagta
saartay dhabada
horumarka

7

Hargeysa

Degmada hargeysa
oo hirgalisay beerta
dalxiiska caruurta

8

Sheekh

Dawlada hoose ee
degmada sheekh oo
dhistay waadhka
Caruurta

9

Gabiley

Doorka ay dawlada
hoose gabiley ku
yeelatay horumarinta
adeega caafimaad
Ee gobolka gabiley

10

Salaxley

Mashruuca qurxinta
iyo dhiraynta wadada
faras-magaalaha deg-
mada salaxley

11

Caynabo

Dhammaystirka
dhaam biyoodka
Degmada caynabo

12

Baligubadle

Horumarinta kaaba-
yaasha dhaqaalaha
iyo bilicda degmada
baligubadle

13

Saylac

Dawlada hoose ee
saylac oo wadadii u
horeysay ee laami
Ah ka hirgalisay saylac

14

Burco

Ololaha horumarinta
wadooyinka ee deg-
mada burco

15

Berbera

Horumarinta adeeg-
yada asaasiga ah ee
degmada berbera

16

Ceerigaabo

Horumarinta adeeg
bixinta dawlada
hoose ee ceerigaabo

17

Lughaya

Dawladda hoose ee
degmada lughaya oo
dhisatay xafiis ay
Ugu adeegto
Bulshadeeda

18

Laas-qoray

Mashruuca iftiiminta
degmada laas-qorey

19

Boorama

Degmadda boorama
oo dib u habayn iyo
casriyeyn ku samaysay
dhismihii suuqa
Hangarka

20

Gar-adag

Dawlada hoose ee
gar-adag oo dugsi
hoose u dhistay tuula-
da dhooba cantuug

21

Oodweyne

Horumarinta kaaba-
yaasha dhaqaale ee
oodweyne

22

Baki

Horumarinta bilicda
Degmada baki

23

Danwadaag
Programme

24

The transforma-
tion of kigali into
africa's cleanest
city & what we can
learn from it.

MAGAALO

MAGAZINE

MAGAALO MAGAZINE WAA WARSIDDE U ADEEGA DAWLADDAHA HOOSE EE SOMALILAND OO AY SOO SAARTO URURKA DAWLADDAHA EE SOMALILAND (ALGASL)

KOOXDA TAFATIRKA

Amani Yuusuf
Bilan Axmed
Cabdilaahi Maxamed
Fahima Maxamed
Hinda Diiriye
Mukhtar Dayib
Siciid Nuux

NASHQADAYNTA: CABDILAAHI MAXAMED




ISSUE 14 COVER



ISSUE 15 COVER



ISSUE 16 COVER



ISSUE 17 COVER



The association of local government authorities of somaliland (algasl) is a non-profit organisation and was established by the local government' mayors on february 2006 in hargeisa, with the aim to provide support to the local authorities, coordinate activities that benefit the performance of the local government institutions and their employees. The association also wants to raise the awareness of local government issues, with share experiences and best practices and find solutions for common problems. Algasl focuses on developing and providing services to municipalities through support to the capacity development; the promotion of closer collaboration among districts and, harmonious and efficient relations with somaliland central government. Algasl wants to become the representative voice of local authorities in somaliland and abroad; to that end, the association will operate through local, regional and international networks and strategic partnerships with organisations which have similar objectives.

ALGASL

Email : algasl.info@gmail.com
 Website: www.algasl.org
 Address: Xaafada Shacabka ka soo Horjeedka Akadamiyada Nabada (APD)

OUR KEY ACHIEVEMENTS 2023

The association's annual meeting was held in hargeisa the achievements of the organization in 2022 have been presented to the members at the same meeting, the 2023 action plan was also discussed.

As part of our effort of building resilience cities in somaliland, al-gasl in collaboration with vng international under danwadaag programme held a drm conference for the local governments in somaliland.

Algasl has donated shovel truck xcmg 400m. To lasanod district and is funded by algasl local government development fund.

Algasl has invested in the new building of somaliland's local government institute, which will strengthen the knowledge and skills of local government staff.

The organization of local governments of somaliland algasl has handed over a water tanker sold by the organization to the sheikh district, which will be used to combat the country's drought.



XILKA IYO WAAJIBAADKA GOLAYAASHA DEEGAANKA LA SOO DOORTAY

Golayaasha deegaanka ee doorashada ku yimaadaa waxa uu waajibaadkooga iyo masuuliyaddaha saarani yahay dhamaan arrimaha ku xusan qoddobka 40aad ee xeerka ismaamulka gobolada iyo degmooyinka ee xeer I.r.23/2019, Golaha deegaanka wuxuu awood buuxda u leeyahay hawl kasta oo ka mid ah kuwa lagu tilmaamay qoddobkan oo looga fadhiyo ka midho dhalintiisa ee ku jira xadka degmadda waana sidan hoos ku taxan:

1. Xoojinta iyo kor u qaadista nabadda, deganaanshaha, kala dambaynta iyo wanaajinta awaamiirta dawlaha.
2. Kobcinta iyo kor u qaadista kaabayaashadhaqaalaha sida jidadka Magaalooyinka gudahooda.
3. Maamulka, horumarinta iyo kor u qaadista adeegyada arrimaha bulshada, sida waxbarashada, caafimaadka, beeraha, xoolaha, degaanka, ganacsiga, nabadgelyada, laydhka, biyaha, igaadhsiinta, nadaafadda i.W.M ee hoos yimaada awooda golayaasha degaanka ee degmooyinka.
4. Maamulka, iyo horumarinta fayadhawrka, bilicda, dhiraynta, iyo dhismaha, dayactirka iyo daryeelka wadooyinka magaalooyinka iyo kaabayaasha dhaqaalaha i.W.M ee dawlada hoose ee maamulka degmooyinka.
5. Aasaasida suuqyo badeeco, xoolaha iyo kaluunka.
6. Kormeerka dhismooyinka cusub, kuwa la cusboonay-

siinayo iyo kuwa u baahan in ladumiyo.

7. Ka hor tagga dhibaataada abaarta, duufaana, dalka halista ah iyo dhibaato kasta oo wax u dhimi karta dadweynaha.
8. Daad guraynta dadweynaha hadii aaf dhacdo.
9. Diyaarinta iyo fulinta barnaamijyada iyo mashaaricda horumarineed ee heer degmo.
10. Horumarinta fank, isboortiga iyo suugaanta.
11. Dhismo goobo biyood oo magaalooyinka iyo tuulooyinka dhexdooda ah.
12. Samaynta iyo dayac tirka wadooyinka.
13. Soo jeedinta iyo codsiga wax ka beddalka iyo habaynta naqshadda magaalooyinka degmadda ka koo-ban tahay si waafaqsan xeerarka maamulka dhulka magaalooyinka.
14. Diwaan galinta hantida ma guurtada ah ee dadweynaha degmada ku nool iyo tan dawlada, ee hoos yimaada masuuliyada golaha degaanka degmada.
15. Diwaan galinta hantida ma guurtada ah ee dadweynaha degmada ku nool iyo tandawlada, ee hoos yimaada masuuliyada golaha degaanka degmada.



MAAMUL-DAADAJINTA WAXBRA- SHADA ASAASIGA AH EE DEG- MOOYINKA DALKA

Maamul-daadajinta waxbarashada asaasiga ah ee degmooyinka dalka oo laga bilaabay sadexda degmo ee kala ah, hargeysa, berbera iyo gabiley. Heshiiska dhamaystirka mashruuca maamul daadajinta waxbarashada asaasiga ah ee degmooyinka hargeysa, berbera iyo gabiley oo qabsoomay. Heshiiskani wuxu awood buuxda siinaya dawladdaha hoose inay maamulaan waxbarashada asaasiga ee degmada.



UCLG-CIB MEETING FOR LOCAL GOVERNMENTS ASSOCIATIONS CONFERENCE

Cib annual meeting of the capacity institutional building (cib) working group is hosted by uclg africa at cad i ayyad university, marrakech, from 15-18 may - the key discussions were improvements in decentralization of international cooperation at the local level, focusing on climate change, gender, migration, and city-to-city.

Senior technical officials from local government associations participated the meeting and as an algal we presented the achievements and some of the challenges on the decentralization process particularly the drm and other functions and shared recommendations and discussion for greater collaboration approaches through cib and other platforms.



Annual meeting on permanent secretary generals and executive directors of the african local government association uclg/africa, of which algal is a member.



Group discussions on gender mainstreaming on a local level

Disaster resilience at the local level, a workshop was arranged on disaster management and the role of local government associations and global policies (sandia framework). Important discussions were held, and the associations shared their achievements in disaster management. Uclg members participated as did other development organizations.





CEEL-AFWEYN OO CAGTA SAARTAY DHABADA HORUMARKA

Qoraaga:
Maxamuud Cabdi Bare
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Ceel-Afweyn

Dawladda hoose ee degmada ceel-afweyn oo muhiimada siinaysa bilicda iyo qurxinta faras magaalaha degmada waxaa ay ka hir gelisay dhismaha balaadhan oo la saaray astaanta jsl.

Dhismahan oo bilicda magaalada wax badan ka taray waxaa lagu sameeyay dhirayn iyada oo maxsuulka mustaqbalku yahay in goobtaas noqoto goob nasasho dhiraysan oo bilicsan.

Ujeedada mashruucan balaadhan ee quruxda degmada muujijay waxay dawladda hoose uga gol lahayd kor u qaadista bilicda.

Golaha degaanka degmada ceel-afweyn oo ay hormuud u yihiin maamulka fulintu waxay bulshada uga mahad celinayaan sida ay ula daryeelen ilaalinta bilicda degmada.

Shaqadan baaxada leh ee dawladda hoose qabatay natiijada kasoo baxday ayaa salka ku haysa ceel-afweyn oo bilic samaatay iyada oo halkaas laga sii wadi doono.

Dawladda hoose ee ceel-afweyn oo ka duulaysa baahida taagan iyo tagto ee loo qabay gaadiidka cagafta waxay soo iibisay cagaf nooca waaweyn ah model lw400kn taas oo loogu tallo galay banaynta wadooyinka qaadista qashinka iyo adeeg kasta oo baahideeda ay dabooli karayso.

Gaadiidkan cagafta dawladda hoose waxay u raacday dariiq haboon taas oo ku qotontay gaadiid anfac degaanka balaadhan ee degmada ceel-afweyn.

Gaadiidkan cagafta mudada uu degmada ka shaqaynayay waxaa la gaadhay yoolal muuqda oo ku salaysan magaalo ka reeban wadooyin xidhan wadiiqooyin laga weecdo iyo werwer waddo xumo.

Natiijada mashruucan laga gaadhay ayaa taabanaysa daboolida baahida loo qabay oo bilaw ah dawladda hoosena ku dedaalayso bilaw ilaa dhamaad in saas u socoto.



DEGMADA HARGEYSA OO HIR- GALISAY BEERTA DALXIISKA CARUURTA

Qoraaga:
Mahdi Ismaaciil Abokor
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Hargeysa

Dawladda hoose ee hargeysa oo ka duulaysa muhiimada ay leedahay in caruurta yaryar ee ku nool magaaladu helaan goobo ay ku ciyaaraan kuna nastaan wakhtiga ay firaaqada leeyihiin ayaa waxay dhagax dhigtay beerta dalxiiska ee caruurta. Goobtan ayaa la dhamaystiri doonaa inta aynu ku jirno sannadkan 2023. Caruurta ayaa fursad u heli doonta ciyaaro kale duwan sida dabaasha, baaskiilka, leexooyin, goobo nasasho, goobo kubada lagu ciyaaro, goobo lagu ordo, iyo ciyaaro kale oo badan. Mashruucan waxaa qayb ka ah haayada un-habitat.

Beerta dalxiiska caruurta ee hargeysa ayaa dawladda hoose ee hargeysa ay ku deeqday dhulka halka kharashka lagu dhisayo mashruuca ay bixin doonto haayada un-habitat.

Mashruucan laga hirgaliyay magaaladda hargeysa ayaa ka imi markii la arkay baahida loo qabo in la helo goobo ay caruurta yaryar ku ciyaarto maadaama aanay hore u jirin. Markii la dhegaystay la tashiyadii kala duwanaa ee lala yeeshay bulshada qaybaheeda kala duwan ayaa, dawladda hoose ee hargeysa oo kaashanaysa

haayada un-habitat ayaa si wada jir ah u fuliyeen mashruucan. Mashruucan oo bilow ah imika ayaa waxaa la rajeenaya inuu qaybwayn ka qaato horumarka caasimada iyo in la helo deegaan nadiifa oo ay caaruurtu ku ciyaaran.



DAWLADA HOOSE EE DEGMADA SHEEKH OO DHISTAY WAADHKA CARUURTA

Qoraaga:
Barkhad Xasan Cali
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Sheekh

Gudoomiyaha golaha degaanka degmada sheekh eng ismaaciil xuseen cali oo ay weheliyaan mayor ku-xigeenka degmada sheekh mudane maxamed faarax axmed mudanayaasha golaha deegaanka, isu-duwaha wasaarada caafimaadka degmada sheekh, iyo agaasimaha cusbitaalka degmada sheekh ayaa maanta dhagax dhigay waadhka dhalaanka oo ay dawlada hoose ee degmada sheekh ku kordhinayso cusbitaalka degmada sheekh.

da degmada sheekh ayaa ugu horayn duqa oo ka hadlaaya baahiyaha cusbitaalka degmada sheekh waxa ugu baaqay bulsho waynta ku dhacqan degmada sheekh inay ka qayb qaatan baahiyaha kale ee hadhay ee cusbitaalku u baahan yahay. Dhismahan ay fulinayso dawlada hoose ee degmada sheekh ayaa noqon doona mid wax wayn ka bedela baahiyaha caruurta ku dhacqan degmada sheekh.

Waadhkan oo laga dhisaayo cashuurta bulsha-



DOORKA AY DAWLADA HOOSE GABILEY KU YEELATAY HORU- MARINTA ADEEGA CAAFIMAAD EE GOBOLKA GABILEY

Qoraaga:
Hibo Xasan Haaruun
Agasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Gabiley

Sida dastuurka somaliland farayo qodobka 17 aad dawlada waxa xil ka saaran yahay horumarinta iyobaahinta adeegyada caafimaad, iyadoo laga duulayo taas, waxay dawlada hoose ee degmada gabiley bilawday dabayaaqadii 2018kii inay dardar galiso adeegyada caafimaad ee guud ahaan gobolka. Ka hor intii aanay bilaabin balaadhinta adeegyada caafimaad ee gobolka waxaa ku yaalay 7 xanaano iyo 8 rugo caafimaad.

Dhamaan xanaanooyinka aan kor ku xusan may lahayn qol dhalmotaas oo keeni karta dhimasho iyo khatar caafimaad oo soo waajahda hooyada iyo ilmahaba, sidaa darteed waxay dawlada hoose ka hir galisay dhamaan todobadda xanaano qol dhalmo. Isla markaana waxay ku kordhisay 10 xanaano iyo 13 rugo caafimaad. Wadarta guud ee xanaanooyinku hada waa 18 xanaano iyo 20 rugo caafimaad dhamaan waxay u shaqaynayaan si habsami leh.

Dhinaca kale waxay dawlada hoose kordhisay shaqaalihii ka hawl galayay guud ahaan gobolka inka badan boqolkiiba boqol iyo kontan(150%), isla markaana waxay kor u qaaday tayayntii shaqaalaha iyadoo loo sameeyay tabobaro badan.

Waxaa xusid mudan in ka hor 2018 degmada gabiley guud ahaan ay ku taalay hal xanaano, maantana xaafadkasta oo degmada kamid ahi ay leedahay xanaano.

Guud ahaan gobolku muu lahayn emergency center (call center) la gala soo xidhiidho marka shil gaadhi ama khatar kale dhacdo, waxay dawlada hoose ka hirgalisay dhakhtar weyn ee gabiley qaybta gargaarka degdega ah si loogala soo Xidhiidho marka shil dhaco ama khatar caafimaad timaado.

Dawlada hoose iyada oo ka duulaysa muhiimada uu leeyahay in la sameeyo kaydka dhiiga waxay dhakhtarka weyn ee gabiley ka hir galisay qayb-


ta kaydinta dhiiga (blood bank).

Si loo yareeyo tirada dhimasha caruurta jirta in ka yar ama leeg 28 maalin, waxay dawlada hoose ka dhistay dhakhtarka weyn ee gabiley waadh loogu adeego caruurta (neonatal intensive care unit).

Dhamaan xanaanooyinka waxa laga abuuray shaqaale sameeeya wacyi galin joogto ah isla markaana hooyooyinka iyo dhalaanka ku booqda guryaha (door to door) si looga war hayo hooyadaiyo ilmaha iyagoo jooga guriga laguna soo xidho xanaanada ujeedada guud ee ay dawlada hoose ka leedahay caafimadku waa in la fidiyo adeega caafimad ee aasasiga (primary health care) si qof kasta oo muwaadin ahoon dagan gobolka gabiley inuu helo adeegcaafimaad oo tayo leh isla markaana dhaqaale ahaan uu awoodi karo.



Ugu danbayn dadaalada badan ee ay samaysay dawlada hoose waxay keenen in muwaadin kastaahelo adeeg caafimaad oo tayo leh, sidoo kale waxaa kordhay 58% tiradii ciyaalka helayay talaal dhamays tiran, waxaa yaraaday dhimashadii ciyaalka ka yar shan sano iyo hooyada xiliga uurka, guud ahaan gobolka waxaa kordhay booqashadii ay booqanayeen xarumaha caafimadka hooyada iyo dhalaanka.



MASHRUUCA QURXINTA IYO DHIRAYNTA WADADA FARAS-MAGAALAH LAHA DEGMADA SALAXLEY

Qoraaga:
CabdiKhadar Axmed
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Salaxley


Dawlada hoose waxay dhawaan qurxin iyo dhirayn ku samaysay wadada magaalada dhexdeeda (faras-magaalaha) dawlada hoose ee degmada salaxley waxay masuul ka tahay nadiifinta iyo bilicda magaalada. Sidoo kale dawlada hoose gaar ahaan waaxda arimaha bulshadu waxay sameysaa olole nadaafadeed iyadoo kaashanaysa bulshada magaalada. Yoolka iyo hadafka arintanina waa in la helo salaxley qurux badan, nadiifa oo cagaaran.

Mashruucan Qurxinta iyo dhiraynta wadada Faras-Magaalaha, Waxay ka mid ahaa mashaariicdii ku jiray Miisaaniyadda dawlada hoose ee 2022.

Golaha degaanka degmada salaxley ayaa ku ansixiyey kal-fadhigoodii July, 2022, waxaanu fulay dhamaadka sanadkii 2022.

Yoolka iyo ujeedada ay dawlada hoose ee degmadu ka leedahay mashruucan Qurxinta iyo dhiraynta faras-magaaluhu waa in la helo Magaalo qurux badan, cagaaran isla markaana Wadada faras-magaaluhu ay noqoto Mu-rayyadda magaalada.

Natiijada kaso baxday markii la dhamaystiray mashruucan waxa ugu muhiimsan inay Quruxda magaaladu tahay dhiraynta iyo Qurxinta wadada faras-magaalaha oo ay imika bulshaduna markaati ka tahay muhiimadeeda.



DHAMMAYSTIRKA DHAAM BIYOOD DEGMADA CAYNABO

Qoraaga:
Khadar Ibraahim Cali
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Caynabo

Iyadoo laga duulayo xaalada biyo yaraaneed ee deegaanka waxaa la dhammaytiray dhaam cabirkii-su yahay 50x50m oo ay maal gelisay dawlada hoose degmada caynaba iyo ururada bulshada. Dhaamkan ayaa waxaa uu ku yimi soo jeedinta dhalinyarada degmada iyo maamulka dawlada hoose ka dib isku tashi waxaa la isla gartay in la hir geliyo dhaamkii.


Si loo yareeyo ama wax looga qabto xaalada biyo yaraanta waxaa lagu dhiiraday dhaamkan oo iskaa wax u qabso lagu hir geliyey iyadoo hormuud u tahay maamulka degmadu.

Ka dib markii lagu guulaystay dhaamkan ayaa waxaa la helay meel ay maamusho dawladda hoose oo laga helikaro biyo-jaban maadaama goobaha kale ee biyaha laga soo dhaamiyo ay leeyihiin dad shacab ah taasina waxay hoos u dhigtay qiimihii biyaha ee foostadiiba la siin jirey sidoo kale waxa la helay goob biyaha looga dhaamiyo goobaha dadweynaha sida iskuulada, xanaanooyinka iyo masaajidada.



HORUMARINTA KAABAYAASHA DHAQAALAHA IYO BILICDA DEGMADA BALIGUBADLE

Qoraaga:
Khadar Xasan Cabdi
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Baligubadle



Dawladda hoose ee degmada baligubadle waxay mudooyinkii ugu dambeeyey ku hawlantay horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha, gaar ahaan dhismaha waddooyinka iyo kor u qaadista bilicda magaalada baligubadle. Waxa ladhisay 3 waddo laami ah oo dhex mara gudaha magaalada baligubadle. Waddooyinkaasi oo isugeyn cabirkoodu yahay 4 km ayaa waxay kor u qaadi doonaan bilicda iyo quruxda magaalada. Waxayna sahli doonaan isu socodka dadka iyo gaadiidka degmada.

DAWLADA HOOSE EE SAYLAC OO WADADII U HOREYSAY EE LAAMI AH KA HIRGALISAY SAYLAC

Qoraaga:
Cilmi Axmed
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Saylac

Dawladda hoose ee degmada saylac oo ka duulaysa masuuliyada bulshada degmada saylac ay u hayso, ayaa waxay shaqadeeda inta ugu badan ku bixinaysaa banaynta wadooyinka degmada. Iyadoo wadadii u horaysay ee laami ah ka hirgalisay degmada aanad sawirada ka arki kartaan.

Xili shaqeedkan (quarter) waxa uu ku soo beegmay xili raxmaadka alle ay dalka intiisa badan uu ka hooray isla markaasna ay daadad badan ka dhasheen daadadkaas ka soo rogmanaya meelaha fog fog ee buuralayda u badan ama wadama dariska ah ayaa waxay ku soo faafaan guud ahaan degmada saylac inteeda ugu badan oo ay bada kagaaraan, waxay sababeen daadadkaasi in ay jaraan wadooyinkii magaalada soo galayey ee degmada ku xidhayey dalka intiisa kale oo qiyaasitii dhan 70km.

Golaha deegaanka iyo fulintoodu iyaga oo ka jawaabaya intii awoodooda ah waxay abaabuleen dhamaan bulshada qaybaheeda kala duwan si iskaa wax u qabso ah loogu furo wadooyinka

soo gala magaalada. Gaadiidka dawladda hoose ayaa dhagax iyo ciidada keenistooda loo adeegsaday halka bulshada iyo maamulkooduna gacanta ay ku dhigayaan wadada.

Abaabul iyo istaageersi ka dib waxa ay bulshada iyo maamulkooda oo isku duuban ku guulaysateen in ay furaan ugu yaraan hal jid oo magaalada laga soo galo lagana baxo.

Waxaynu ka baranaynaa shaqaadaas lagu qabtay wada jirka in ay tusayso bulshada lahaanshaha dhulka iyo lexjecladooda iyo in ayna dawlad uun aanay wax laga sugin.



OLOLAHA HORUMARINTA WADOYINKA EE DEGMADA BURCO

Qoraaga:
Mubaarak Yuusuf Maxamed
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Burco

Dawladda hoose degmada burco oo ka duuleysa kor u qaadista kaabayaasha dhaqaalaha degmada waxay hirgalisay dhismaha waddada manhal taas oo cabbirkeedu dhan yahay 2 km.

Mashruucan wuxuu ka mid ahaa mashaariicda u qorshaysnaa dawladda hoose ee degmada burco ee u fulay sidii loo qorsheeyay. Waxa sidoo kale dawladda hoose ee degmada burco ay kordhisay dhismaha iyo tayada ay leedahay wadani, dedaaladan ayaa qayb ka ah horumarinta degmada burco iyo wax qabadka ay wadaan guddida fulinta ee degmada burco taas oo wax weyn u tari doonta bulshada ku dhaqan degmada burco waxaanay kaga raysan doonan cidhi-

idhigii magaalada. Wadani ma noqon doonto tii u dambaysay ee dawladda hoose fuliso dhismaha lakiin waxay noqon doonta bilawga wadooyin caalamiya oo la jaan qaadi doona wadooyinka caalamka iyo magaalooyinka kale ee faceeda ah. Dhisida wadooyin tayo leh waa bilowga magaalo horumarsan.



HORUMARINTA ADEEGYADA ASAASIGA AH EE DEGMADA BERBERA

Qoraaga:
Khadar Maxamed Cumar
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Berbera

Wadooyinka
Wadada dhex marta suuqa dhererkeeduna yahay 1.3km waxa ay kamid tahay kor u qaadista kaa-bayaasha dhaqaale ee bulsho, wadooyinka gudban ayayna ka mid tahay kuwaas oo mara suuqa. Wadooyinkaasi waxay kamid yihiin mashaariicahii qorshaysnaa ee fuley waxayna wax ka tari doonaan adeegsiga bulsho iyagoo noqondoona kuwo sahla isku socodka gaadiidka isla markaana bulshada adeegsanaya ku dareemaan deganaan marka ay marayaan.


Wadada sabawanaag oo dhererkeedu yahay 1km waxaa laga hirgeliyey xaafada wadajir ee degmada berbera, waa wado aad muhiim ugu ah xaafada sabawanaag, waxayna ku timi la tashi bulsho oo la daraasey in mudo ah, waxayna kamid tahay wadooyinka qabsooamay sanadkan waana wado casri ah marka la eego habka loo dhisay, waxaana la sameeyey "visibility study" ka hor intaan la qabanin shaqadeeda, xaafadana waxbadan bay kusoo kordhinaysaa bilicda iyo kaabayaasha kale ee dhaqaaluhu kamid yahay.

Kor u qaadista adeega caafimaadka aasaasiga ee guud ahaan degmadda berbera ayuu kamid yahay mashruuca dhismaha phu-ga geelookor taas oo bixin doonta adeega hooyada iyo dhalaanka taas oo dabooleysa baahi jirtay oo ay bulshadu u qabeen adeega caafimaadka aasaasiga ah waxaan la dardar galinayaa habnidaamkeeda shaqo si ay kaalin mug leh uga qaadato baahiyaha caafimaad ee deegaanka, iyadoo dadka loo adeegaayo.

Dhismaha xafiiska caafimaadka degmadda waxa uu qayb weyn ka qaadayanaayaa maamul wanaaga iyo maamul daadejinta adeega caafimaadka aasaasiga ah ee degmadda waxaana laga hirgeliyey misaanayada dawladda hoose ee degmadda berbera kaaso oo si casriya loo qalabeeyey kana hawgalaan hawladeenada caafimaadka degmada.




Wadada Gudban ee dhex marta suuqa {Telesom area}




Wadada sabawanaag ee xaafada wadajir



PHU-GA GEELOOKOR



Xafiiska caafimaadka degmadda Berbera



HORUMARINTA ADEEG BIXINTA DAWLADA HOOSE EE CEERIGAABO

Qoraaga:
Maxamuud Axmed Cali
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Ceerigaabo

Caafimaadka

Dawlada hoose ee degmada ceerigaabo waxay aqoonsantahay baahida caafimaad ee ku degaaman bulshada ku nool degmada ceerigaabo, iyadoo taas ka duulaysa waxay door muuqda oo hogaami-need ka ciyaarta daboolista baahidaas.

Inkastoo aanay dawlada hoose degmada ceerigaabo aanay ku jirin degmooyinka loo soo dhaadhiciyey in ay maamulaan caafimaadka aas-aasiga ah hada taasi kama joojin in ay ka qaadato doormuuqda daboolista baahidaas.

Sidaas darteed dawlada hoose ee degmada ceerigaabo waxay xaafada barwaaqo ka dhista mch kaas hada uu dhismihiisu dhan yahay ayna u hadhay qalabayntii.

Baahidaas caafimaad xaafadaasi ay u qabtay horena aan wax mch ahi uga furnay ayey dawlada hoose rajaynaysaa in wax weyn ka tari doonto horumarinta adeegyada caafimaad.

Sariibada

Dawlada hoose ee degmada ceerigaabo waxay garwaaqsantahay doorka muhiimka ah ee sariibaduhu u leeyihiin dadweynaha ku nool degmada ceerigaabo iyo dawlada hoose laftigeeda oo uu dakhli kasoo galo sidaas darteed dawlada hoose waxay ee ceerigaabo waxay dib u dhis, casriyeyn iyo balaadhin ku samaysay sariibada magaalada ceerigaabo.

Wadooyinka

Dawlada hoose ee degmada ceerigaabo waxay samaysay iyadoo tixgalinaysa baahiyaha bulshada waxay hirgalisay wado celcelis 3km ah oo ku soo wareegta dhamaan xarumaha dawlada ilaa beerta nuura.




DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA LUGHAYA OO DHISATAY XAFIIS AY UGU ADEEGTO BULSHADEEDA

Qoraaga:
Cumar Cismaan Aadan
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Lughaya

Dawlada hoose degmada lughaya oo xafiis casri ah dhisatay, xafiiska oo ka kooban, afar xafiis iyo hoolkii shirarka, afar suuli iyo hal store. Dhamaan waxa laga fuliyey kabka dawlada hoose. Qorshaha xafiiska loo dhisay wa in loogu adeego guud ahaan bulshada, degan lughaya.

Ujeedada ugu wayn ee shaqadan lo qabtay wa in bulshada loogu adeego xafiis tayo leh. Sidoo kale wa in dawlada hoose yeelato xafiis ka balaadhan kii hore, madama adeega dadwaynaha loo qabanayo u kasii badanayo marba marka ka danbaysa. Dadkuna si fahmayan nidaamka dawliga ah.

Natiijada kaso baxday shaqada la qabtay wa in baahidii loo qabay xafiis balaadhan in la helo, oo sifiican u qalabaysan, bulshada loogu adeego.



Xafiiska Dawladda Hoose ee Lughaya



MASHRUUCA IFTIIMINTA DEGMADA LAAS-QOREY

Qoraaga:
Carafaad Maxamed Diiriye
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Laas-Qorey

Dawlada hoose ee degmada laas-qorey waxay mar walba u heelan tahay u shaqaynta bulshada ay matasho iyadoo u diyaarinaysa deegaan ku haboon in lagu noolaado oo ay u dhanyihiin kaabayaas-hi dhaqaale sida biyaha, caafimaadka, korontada, iyo goobaha waxbarashada, iyadoo taas ay ka duulayaan maamulka dawlada hoose ee laas-qorey waxay dhawr mashruuc ka wadaan degmada, mashaariicda waxa ka mid ah mashruuca nuurinta degmada laas-qorey oo ah mashruuc aad ay ugu baahnaayeen bulshada ku dhaqan degmada laas-qorey aadna u soo dhaweeyay mashruucan oo wax badan ka tari doona bilicda degmada iyo iftiiminteedaba.

Maamulka degmada laas-qorey iyagoo ka duulaya baahidan soo wajahday bulshada waxay sameeyeen waax qaabilsan kana shaqaysa bilicda magaalada. Waaxda shaqooyinkeeda waxaa ka mida nadaafada iyo bilicda magaalada. Talaabada 1 aad ee ay qaadeen waaxda cusub ayaa ahayd in qandaraaska laambadaha nooca wadooyinka ee solarka wata la xayaysiiyo si loogu faaiday-eeyo ganacsiyada yar yar loona dardar galiyo dhaqaalaha maxaliga ah ee degmada.

Waajibka saaran dawlada hoose ayaa ah in ay horumariso kaabayaasha dhaqaale ee magaalada si ay u noqoto magaalo nolosha ku haboon.

Intii mashruucan dawlada hoose fulisay waxaa isbadal weyn laga arkayaa degmada laas-qorey oo imika aan u nuuraysa bulshadiina ka raysteen mugdigii.



Samsung Quad Camera
 Shot with my Galaxy A21s

DEGMADDA BOORAMA OO DIB U HABAYN IYO CASRIYEYN KU SAMAYSAY DHISMIHII SUUQA HANGARKA

Qoraaga:
Cabdiraxmaan Muxumed Rooble
Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Boorama

Dhismaha suuqa hangarka degmada boorama oo dhisme cusub oo casriya laaga hirgaliyey wuxuna ka koobanyahay dhismahaasi 10 bakhaar. Kadib markii uu suuqii hangarkii hore oo dhismihiiisu mudo dhisnaa uu noqdey mid dumaya duugoobayna sidaas darteed ayaa golaha deegaanka ee cusub waxay isla garteen in ladumiyoyo dibna loo dhiso dhisme casriya oo tayo leh.

Kadib markii ay codsadeen dadweynihii ku ganacsan jirey in dib loodhiso, dhismahan ayaa ah dhismayaasha bulshada boorama ku ganacsadaan.

Ujeedada keentay indhismahani dib loo casriyeeyo ayaa ah labo sababood, in uu noqdo dhisme ku haboon in lagu ganacsado isla markaana ah mid aad qurxoon iyo in dakhliga degmada kor uqaado.

Waxaana bulshada ku dhaqan degmadda boorama gaar ahaan hoyooyinka ku ganacsada dhismahani ay aad u soo dhaweeyeen suuqaan cusub ee dawladda hoose degmadda boorama u dhistay, waxaana uu kamid noqon doona dhismayaasha casriga ah ee bulshada ku dhaqan boorama ay iska leeyihiin.

Dhismahan cusub wuxuu dhismihii hore kaga duwanaan doona xaga baaxada iyo faalalka.



DAWLADA HOOSE EE GAR-ADAG OO DUGSI HOOSE U DHISTAY TUULADA DHOOBA CANTUUG

Qoraaga:
Cabdiraxmaan Daahir Yuusuf
Agaasimaha Waaxda Qorshaynta iyo Horumarinta D.H Gar-Adag

Dawlada hoose ee degmada gar-adag iyadoo ka duulaysa kor u qaadista waxbarashada waxay ka hirgaliyey tuulada dhooba cantuug dugsi hoose taas oo ay dadka deegaankaasi baahi badan u qabeen, mashruucanina wax uu ka mid yahay mashariicdii u qorshaysnaa degmada gar-adag ee laqabtay.



HORUMARINTA KAABAYAASHA DHAQAALAE EE OODWEYNE

Qoraaga:

Mustafe Faarax Cawil

Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Oodweyne

Dawladda hoose degmada oodweyne iyadoo ka duulaysa kor uqaadista kaabayasha dhaqaalaha waxay hirgelisay dhismaha wadada ku soo wareegaysa degmada taas oo cabirkeedu dhan yahay 1.5 Km. Mashruucana waxa uu ka mid yahay mashariicaha qorshaysnaa kuwaas oo ku yimi latashiyadii bulshada degmadda oodweyne.

Dawladda hoose degmada oodweyne iyadoo ka duulaysa kor uqaadista adeegyada aasaasiga ah waxay hirgelisay xanaanooyin iyo goobo waxbarsaho iyadoo ujeed keeduna yahay in kor loo qaado dhamaan adeegyada aas aasiga ah sida waxbarashada iyo caafimaadka.

Dawladda hoose ee degmada oodweyne waxay hirgelisay mashaaric aad u badan mudadii 2 sanadood ee ina soo dhaafay dhamaan mashaariicdan waxay ka timi qorshihii shanta sano ee degmada u qorshaysnaa oo ah qorshe ku salaysan baahiyaha degmada is la markaana ka yimi bulshada.

Dawladda hoose degmadda oodweyne waxa ay ka mid tahay degmooyinka ugu danbeeyay ee la qaatay mashruuca maamul daadejinta ee jplg iyada oo losoo daadejiyay adeegyada aas aasiga ah ee caafimaadka iyo waxbarashada wallow aan adeega caafimaadka iyo waxbarashada aan si dhamaystiran loogu samayn maamul daadejin dhamaystiran.

Sidaas daraaded dawladda hoose degmadda oodweyne iyadoo udiyaar ah maamul daadejinta dhamaan adeegyada aas aasiga ah waxa ay hirgelisay dhismaha xarun cusub oo uu yeelan doono adeegyada aas aasiga ah sida hir galinta goobo caafimaad (mch) iyo hirgalinta baro caafimaad (health post ama hps).

Bilawga xanaanooyinka.

Dawladda hoose degmadda oodweyne iyadoo fulinaysa qorshaheda sanadlaha ah waxa ay galisay 2 mch:

1. Xanaanada dabagoryale
2. Xanaanada laan mulaaxo.



HORUMARINTA BILICDA DEGMA- DA BAKI

Qoraaga:

Cabdiraxmaan Cabdilaahi Yaxye

Agaasimaha Waaxda Qorsheynta D.H Baki

Dawladda hoose ee degmada baki waxay masuul ka tahay quruxda iyo bilicda magaalada baki Dawladda hoose ee degmada baki waxay mar walba ku hawlan tahay Samaynta iyo banaynta wadooyinka magaalada dhexmara iyo Dhiraynta magalada baki meelaha muhiimka ah sida wadooyinka, iskuulada iyo mch.

Waxay kale oo gudida fulinta ee degmada baki wadooyinka magaalada ku xidheen laambado iftiimiya laamiyada magaalada dhexmara.

Xafiiska dawladda hoose ayaa wargalin siiya bulshada si ay uga diyaar garoobaan Uguna furtaan wixii agab ah ee kayaala meelaha wadooyinka marayaan Waxa kale oo bulshada lala socod siiyaa inay ka qayb qaataan dhiraynta magaalada iyadoo dawladda hoose dhir u qaybiso bulshada.

Waxa bile loo kormeelada bad qabka wixii laqabtay Sida dhirta, laydhkii wadada lagu xidhay iyo in wadooyinkii la sameeyey.

Shaqadan waxa loo qabtay in muwaadinkasta helo wado fiican oo nadiifa isaguna ilaashado In muwaadinkasta helo amaan xili walba tusaale laydhka wadadu wuxuu ka qayb yahay amniga magaalada In muwaadin kastaa helo magaalo dhiraysan oo qurux badan si loo helo magaalo cagaaran oo cimilada ku wacan.

Wadooyinkaasi waxay wax wayn ka tareen isku socodkii dadka iyo gaadiidka quruxdii iyo bilicdii

magaalada Dhirtu waxay ka qayb qaadanaysaa quruxda, bilicda iyo isbedelka cimilada.

Laydhka magaalada baki oo aan lahayn laydh 24 saac sidaa darteed laydhka aan wadooyinka ku xidhnay wuxuu ka qayb qaatay iftiimta magaalada xiliga habeenkii.



CONFERENCE ON DISASTER RISK MANAGEMENT EMPOWERS MUNICIPALITIES IN SOMALILAND

May 11th, 2023 – The recently concluded Conference on Disaster Risk Management (DRM) for ALGASL Member Districts and Public Authorities with Round Table Discussions brought together key stakeholders from municipalities in Somaliland to foster inclusive and effective DRM practices. The conference, organized by the VNG International under its DANWADAAG programme, aimed to present the achievements of DRM Units established in Hargeisa and Burao districts while providing guidance for their replication in other municipalities.

With over 13 mayors and deputy mayors, along with 15 high-level delegates from local governments, Director General from Ministry of Environment, Director of Planning from NADFOR, Ministry of Interior and ALGASL in attendance, the conference served as a crucial platform for sharing experiences and exploring strategies for disaster risk management. The event emphasized the importance of DRM Units in enhancing government legitimacy and strengthening the social contract between communities and public authorities.

During the conference, the DRM Units of Hargeisa and Burao districts showcased their accomplishments and engaged in meaningful discussions to address observed challenges. The participants provided constructive feedback, contributing to the continuous improvement of these units and their long-term sustainability.

The round table discussions facilitated dynamic conversations on disaster risk management, encouraging mayors and public authorities' leadership from diverse districts to exchange ideas and best practices. The discussions revolved around the establishment, management, and integration of DRM Units within the broader work of municipalities, emphasizing the significance of inclusive and transparent DRM.

The conference featured a comprehensive step-by-step guideline for the establishment of DRM Units, ensuring municipalities have a clear roadmap to follow. Expert insights and lessons learned from similar initiatives in other contexts were shared, enriching the knowledge and capacity of participants.

The success of the conference highlights the commitment of the DANWADAAG consortium and its partners, including VNG International, CARE Netherlands, Free Press Unlimited, and MedialNK, to foster efficient and effective disaster risk management practices. By bringing together key stakeholders, the conference contributed to the achievement of DANWADAAG's outcomes, including increased community contribution, improved support from civil society organizations, enhanced provision and coordination of DRM by public authorities, and increased dissemination of relevant DRM information through media channels.

The knowledge and experiences gained from the conference will play a crucial role in scaling up DRM efforts across municipalities in Somaliland. By empowering local governments and fostering collaboration between public authorities and communities, the conference has laid the groundwork for enhanced disaster preparedness, response, and resilience in the region.



The DANWADAAG programme

Public authorities play a key role in building better futures for people and communities. The trust and legitimacy public authorities enjoy partly depends on the way in which they implement policies and deliver services. In times of crisis, people are even more reliant on the actions taken by public authorities, especially at local level. Currently Somaliland's local governments struggle to address the country's multiple crises effectively.


The DANWADAAG programme seeks to strengthen Disaster Risk Management (DRM) capacities in Somaliland to enhance local government legitimacy. These efforts reach beyond local governments and entail strengthening communities, civil society organisations (CSO) and local media. The inclusion and participation of communities and CSOs, greater transparency on the side of local governments, and the availability of reliable information by the media, will help to build trust in public administration and leadership. Our programme therefore contributes improving the social contract between communities and their local governments.

Where we work


Currently the programme is active in Hargeisa and Burao. Over time the programme will use an incremental piloting approach, thereby increasing its impact across regions. Such increase is facilitated by the existing presence of all organisations in charge of implementing the programme.

How we work

Improving Disaster Risk Management and effectively tackling crises is an interconnected and ever-changing matter. Treating the various elements and stakeholders as separate will not provide solutions. Our strategy therefore involves multiple approaches which enable the delivery of responsive and result-oriented capacity building.



A **multi-stakeholder approach** is imperative given the number of stakeholders involved: local governments, media, civil society and communities. Strengthening legitimacy between these actors is central. On the one hand DANWADAAG seeks to strengthen " **input legitimacy** ", this is



Somaliland provides the programme with a continuous changing context, in which nothing is set in stone. Applying **adaptive programming** therefore becomes crucial to operate in its volatile environment. We continue or adjust our approach and planning based on best practices and lessons learned, contextual developments or growing needs. Scenario planning is part of our adaptiveness. In order to respond to the continued risk of COVID19 and location prone shocks and disasters we plan for both physical and digital delivery of capacity building with a reliance on localised project management. With DRM being the policy area of DANWADAAG, public authorities will also learn how to identify possible scenarios as well as how to prevent or address them, as part of our capacity building interventions.

DRM operates within the nexus of prevention-preparedness-response-recovery. Through **nexus programming** we seek to strengthen local actors' capacity in managing this. We interlink with international actors' humanitarian and peace-building interventions to capitalise on the comparative advantages of each sector (triple nexus).

Gender equality is key in achieving sustainable results, even if it is not the path of least resistance in Somaliland. The inclusion and meaningful participation of both women and men in government, media and civil society is one of the main ambitions throughout the implementation of DANWADAAG.



THE TRANSFORMATION OF KIGALI INTO AFRICA'S CLEANEST CITY & WHAT WE CAN LEARN FROM IT

Many cities worldwide have made efforts toward cleanliness and in the process, have made great progress to begin with. But cleanliness is an effort that must be relentless. Such an effort has been difficult for many cities that have relapsed into low levels of sanitation. What is remarkable is that Kigali continues to be sparkling clean, day in and day out. Additionally, the city stands beautified by flowers on medians, new gardens, more trees, and groups of sweepers working in shifts to maintain roads, footpaths, and public places.

In this regard, voices do get heard about the government's ruthless implementation of its resolve to keep the city clean. Authorities have indeed been harsh in clearing out informal settlements, driving away factories from wetlands, and enforcing 'Umuganda' without brooking any opposition. Some have termed 'umuganda' as forced labour. In many ways, critics saw semblances of the social disruption caused by Haussmann's renovation of Paris that displaced large numbers of the poor on account of the demolition of their dwellings. However, it is also true that efforts were made by Kigali authorities to resettle the poor and provide alternate sites for factories along with compensation. Notwithstanding the strict implementation, the end result has been that practices of cleanliness seem to have become second nature to the majority of citizens and now are an accepted way of civic life.

Authorities have indeed been harsh in clearing out informal settlements, driving away factories from wetlands, and enforcing 'Umuganda' without brooking any opposition. What lessons does Kigali have for other cities?


Three things stand out:

There must be a comprehensive plan for cleanliness so that each element of public hygiene, backed by appropriate land use, gets simultaneously implemented. Merely picking up waste is not enough. The city must be laid out in some order so that the job of cleanliness becomes manageable.

The magnitude of the task is such that enforcement is vital so that everyone falls in line and contributes to the fulfillment of objectives. This is because everyone generates waste on a daily basis; hence everyone has a share in the responsibility to clean up the city.

The effort has to be relentlessly ongoing so that the city does not relapse into practices that would destroy the spotless cleanliness of the city.

Kigali also demonstrates that the rewards for cleanliness are multi-dimensional. The city has become a highly sought-after destination for businesses, conferences, and international tourism, leading to the city and country's rapid economic development.





MAGAALO

MAGAZINE